TUSOW

II

TILMAAN

Eedan Mad Isaaq

****

BUUGGAAN MAGAASHEY MAY LA ERREY

TUSOOW II TILMAAN

MAYNA QOREY: EEDAN MAD ISAAQ

****

****

T U S O O W I I T I L M A A N

TAARIIKH

MUQDISHO, 01/07/1987

QORE:

AADAN MAXAMED ISAAQ

****

MAHADNAG

Buuggaan oo eh kii inka horreeyn oo ku sheekooyaaw Sheekh Abdulle Isaaq qisooyinshee oo liin hilmaama korna, oo ku hadalaayi Guubaabada Islaamka ii adkeenta diinta Islaamka.
Yeedho buuggaan lahanka kooba korna qisooyinshee yaa may haku reebaanee intun unu haku qaadani.

May mahad gaar eh in nagay dadkii galanta ii siyi qoroowka buuggaan, oo shal eh:-

1. Mahamad Aliyow Emed
2. Sa'adiya Ibreehim Mad
3. Huseen Hasanow Ebdi
4. Eedan Ibreehim Aliyow
5. Jimaale Eedan Malaaq.

Ii dadkii kale oo yoona galanta wiin ku jaysadi, tala ii tusaalana iinla diyaar haayi, oo ii guubaabiyi qorowka buuggaan, yoona may ku mid haayeenaa:-

1. Sheekh Eedan Ala (Culumaada Bokool) 60 jer, ka dhalada Gobolka Bakool eed-kayaal.
2. Sheekh Mad Aliyow (Culumaada J/dhexe) 50 jer, ka dhalada Baardheere, G/Gedo.

Eedan Mad Isaaq(Kuusoow).

HORDHI'

Buuggaan oo magaashey la erraaw "Tusoow ii Tilmaan" oo ku hadalaaw Nololiii Sheekh Abdulle Isaaq Abdi Mooge ii sidii usu qiib wiin unku qaadadi faafiyowka Diinta Islaamka, ii sidii usu wal inka tara jeri dadka masaakiinta eh.

Sheekh Abdulle Isaaq may dadka Muslimiinta eh in sheegeey inii Adduunyadun liniis rasiina oo yeeda lamma gee eta; Aakhira wiinayna yee hal sina la too eta, amal fayla inii yoo ka dedaalaan-na waajib eta.

Sheekha may hanuun wal ku tataabadey inii la badiya Alla obsoodiis, ii Dikriga Ilaahay.

Buuggaan may haka qaadanay Qowsaan yaryar oo usu Sheekha dadka Muslimiinta eh wal unku sheegaayi tusaalana unku biyaayi dadka Muslimiinta eh; yeedoo lahan kooba korna Sheekha ~~#~~ higmadiis yaa inta buuggaan ku qoron haku qaadani.

NOLOLLOD SHEEKHA

Sheekh Abdulle Isaaq Abdi Mooge, may ka dhaladay Gobolka hata liin gorodaaw Gobolka Bakool oo maddii hore ku mid haada jeri Gobolkii la erraayi (Jubbada Sare), beeroogoo in dhaw, oo ka higa dhiniga Haween liin kasaaw(Sarmaan), eelkoo ka yaala oo la erraaw "Gowraar".

May ku beegantaa sannadka maddii usu haayi mayna dhimmaday sannadka maddii usu haayi 1875, mayna dhimaday usugoo 63 jer eh.
Sheekha aawshey may la erraayey "Soofa Isaaq", Aashey may haayey lan uluma eh oo quraanka akhrisjay ii fasirowshay iska too in eyiin, mayna ka dedaaley Soofa Isaaq, in usu owlaadiis diin bra, Ilaahayna la garab gali, owlaaddiisma diin in baradeen.

Sheekh Abdulle Isaaq oo ku mid haayi owlaaddii Aw-Soofa Isaaq yaa may ka dedaaley in usu barada diinta Islaamka yaa may hanuun jeelaayey dugsiga Quraanka, hamiin ii geena quraan barashoodiis yaa ka dedaalaayi. Abdulle Isaaq abdi, intii usu yaraayi may haayey kuri bashaash eh oo farah badan, dadkini ma dhiba jarna mayna rahà jaray erinshoo, maddii usu idoo roogoona, shaqadii kale oo jarta yaa wal ku qabada jari.

Abdulle Isaaq, reerooshoo ma haayna reer eed in hodon eh, waana ma haayna reer eed in liidada, laakiin may haayey reer oo da ii duunyaaba inka badanaayna waana inka yaraayna.
Abduule Isaaq may haka barbaarey daba' fayla, muslin in gargaar, ii barashooda diinta Islaamka eh.

Sheekh Abdulle Isaaq may haayey lan Ilaahay Hoola ii Owla-adba siiyi, hoola, may lahaayey, Gaal, lo', ii Erin.

Geekoo usugoo hoolaashey wededoo geedde eya, yaa may kooyey wartoo, hoolaasheyna eed in oomanyiin, dadkii warta roogi, yaa may warsadey in yoo in ogolaadaan biyoo warta ka jera, si hoola-asheey inka waraabsada, dadkii warta rôôgi may iswarsadeenaa lankii usu eya, ii lan gorodaawba, markii yoo kasaŷ waayeen yaa may inka jawaabeenaa, hoola ada biya siisata isku dhaafee ada naftaa wal in waraabta maka siyaana; may weeley, lamma siyoodba makiin siyaana, (1)- marka inka horreyta maka kasaana, (2)- mar-ka lammaadna, geeka may ba waaha "War-reeb". Sidaasaa ka raalli haadaasa.

Sheekh Abdulle Isaaq usugoo ka murugsan biya la'aanta usu ii ow-laaddiis ii hoolaashey, yaa may tiriyeey qawsaantuun Roob-doona eh.:-

Huureeyy Haw asney
Hayawaan dhiboodeey
Hodon Qawiilow
Haas dhiboodey
Hasiil yaraadeey
Hana hoob!
Hana hoob!.

Sheekh Abdulle Isaaq, markaas eedaa in kurboosanaayi; wal yar ku demba hogol fayla yaa irka ha haboogdi, roobaana in qubudi, sidaasaa usu ii owlaaddiis ii hoolaashey ka oon baheen.

Mu'jisaadka Sheekh Abdulle Isaaq, may ku mid haatey: Aadiis oo dhimiti yaa majidshee galantiis ka dhigidi, dadkii la degganaayi yaa doogii is deersiyi, oo sheeka ku weeldhadi, doogii yaa maddaas ha deeri Sheekh Abdulle, markaasaa may tiriyey qawsaantun oo usu kuku hadalaaw in aadiis dhigidi oo wal humaati eh in suubina, mayna errey:-

Marroorta aayow
Maniin habrowtoo
Manoo habrowtoo
Megel ma dhaantoo
Maftii ku dheegeey
Maddii dhigi may halaayi?

Lankii su'aala warsadi oo haayi Ishraaf, oo usuuna Aalin ahaayi, yaa may ku yaabay, jawaabtii Sheekh Abdulle. Maddaasaa usuuna may Erreey:-

Higma badanaa
Hebedjeey hariira
Fadheeta.

Sheekh Abdulle oo usuuna ku jawaabaaw yaa may erreey:-

Hebedkay may hariira
In fadheesida harankaa
Munkar laka suurya.

Shariifka sidaas liin habaari may la era jareey "Sheekh Cabdu Nuur", usu ii Sheekh Abdullaba lan welba udurkii laka habaara ka dhiyi, Shariifka ilaa geeka la rɔoga munkar yaa laka siyaaradee, laakiin Sheekh Abdulla Isaaq udurkii ka dhiyi ee man dhimana.

Sheekha usugoo ka hadalaaw dadka waanta-waalada eh oo dheel maaya wal kala in ku fekeraana yaa may ku erreey:-

Shug shug gureegoo
Shanbal dhaweegoo
Hamiin shukaayeegoo
Shirkii qiyaama shantiis
Faryaad sheega doonaan.

Markoo usugoo dadka usu ka dheh noolaay inku digaaw in adduunyadun liinka waaraana oo liin baahaaya in Aakhira liin amal falada yaa may ku erreey:-

Duhur galooba
Dadley inii la
Duugaaw duulyaw ogaada,
Deher adduuya
Dumowshee ma
Dheere duulyaaw
Ogaada.

Sheekha, habarta usu qabi yaa may in kariya jertay hungura oo anfa'a waayi. Markii usu in gegsada waayi yaa may erreey:-

Saba sidooley
Wal kiinka sheegeey
Sida ma dhaamadaasoo
Sedkaaba naaraa eh.

Geekoo kale, Sheekha usugoo dadka ka hanuuniyaaw inii dadka muslimiinta eh iilshoo in aftiiniya yaa may Ilaahay ku tuugay in qabrishoo inka asiirinà, mayna errey:-

Ilaah wiinow
Aymoo kii tuugnay
Oow galooba uumow
Ersaagow, iilii
Hawaaleed niin aftiini.

Usugoo dadka bilaanta si hun in tumaaw ku hadalaaw ama kan hadalka hun ka erraaw, habarta usu qaba oo shar-'igaba in binaayaana inii bilaanta la qaba aay ii af-humi liin jaysada yaa may errey:-

Nag hun nageegoo
Nibir hun dhaweegoo
Nashuudba waaha
Nikaah Islaameed
May ku reeboo.

Usugoo habartii intii galantiis inteegi yeedana farag haku siidi yaa hoostana hadal usu in dheegna ku erti, markaas may ku errey hadalkaan:-

Gur goddii doodadii
Galan ridoodoo
Gurub libeeladoo
Guulow abbookey
Gogoleyba haatoo
Gaaley ma jeeytoo.

Usugoo dadka in tilmaamaaw inii yoo Alla wiina ku Obsadaan, toobadana ka dadaalaan, aakhirana inku hadalaaw, yaa may erray:-

Aabud obsooy
Obsa la roor
Aymadaase,
Aasii la yaabey
Intii liin sheegaaw
Ooftiis in haayna.

Usugoo ku hadalaaw in bilaanta yoo eyiin walaa megelka in hor kahaaw dembiga, yaa may megelka inku digaayey inii bilaanta inku weelna baadinimaada ii dembiga yoo in jiidadaayaan; mayna erreey:-

Galan dhidhiibtoo
Geedo tilmaantoo
Geekii amuuddo
Guulow abboomey
gogoleyba haatoo
Gaarley ma jeeytoo.

Usugoo ku hadalaaw faa'iidada ii waltarka ii hasanaadka yeeda leta salaadda subah, yaa may dadka ka hanuuniyaayey inii salaadda subah fadlishee badanya, oo yoo inku daayna, mayna errey:-

Waakii ha nuureey
Waysaada boobneen
Waakii qiyaamaa
Webigii jinnaad
Wableysadaanee.

Usugoo ku hadalaaw dadka in aamminsanaayna Quraanka kariimka eh oo in ogaayna in quraan usu daawo eya, oo waltaraaw, yaa may errey:-

Yaasiin diidow
Waakii qiyaamii
wareera doonta.

May kaloo ku hadalay Sheekh Abdulle Isaaq, waltar dorrooda usu adduunkan laya, ~~kuya~~ maal badan oo laka raahaysada adduunka korshay faa'iida in lahaayna, lankii amal suuban aakhira in hormarsada ley faa'iida helaaw; mayna erreey:-

Tinaad adduunya
Wal ma taraa
Intii la tuboo
Laku tabee
Taliye Ilaahow
Adii ka tuugney
Todobaada naarood
Toona ay na daarney.

Usugoo Sheekh Abdulle Isaaq ku hadalaaw inii Naba Mahamed(S.C.) usu eya Nabayaalka kan inka danbooya, oo naba ku dambooya in kooyaana; yaa may errey:

Naboow gadaalsheey
Nabii ku kooyee
Noo haaraanaah
Nafteen ku dhoorneen
Naartii ayna aan-nee.

Sheekha usugoo ku hadalaaw dadka war-sheesheegga badan, oo namiinka eh, dadka muslimiinta ehna iska faraaw yaa may ku erreey:

Sheesheeg adduunya
Shibaa ku roona
Shaahid runow
Shirkii qiyaama
Shantaa faryaadaa
Ka sheega doonaan.

Markoona usugoo ku hadalaaw dadka waanta-waalada eh; oo intii yoo tuuradaan kibir la tataagsadaaw, oo tubaakada afshey inku biyaana, towba in lahaayna, tii aakhira inku fekeraana , yaa may dadka tusaaleeyaayey inii usu faa'iida in lahaayna; mayna erreey:-

Tutuuradeegoo
Tubaaka aankoo
Titeegsadeegoo
Towba diidkoo
Maddii tabaaw
Taaluku waa
Toloow ogaada.

Sheekha usugoo ku hadalaaw in malabka shinnida asalshey ku kooyi malaalada, waana in binaawaayna in la aama, yaa dadka may inku digey in lankii malaalada aama ii lan aami moonka dameer iska mid eyiin; mayna erreey:-

Malab bilaawshey
Malaala waa may
Ku moogdii,
Malaala aankii
Moonkii dameereed
May in dhaafee.

Markoo kale usugoo ku hadalaaw udur usu ka dhiyi oo haayi "Hariira" yaa may Ilaahay ku tuugay inii usu ku faaysiiyi jirridaas oo dhiti, mayna errey:

Muda ii masaar
Mogdor ii maaraan
Miin dhibboodoow
Meel binaan
Moodkay in saartoy
Mahamed abbooshey.

Usugoo Sheekh Abdulle Isaaq, aragi habar dhalaasa, yaa may ku murugooday dhibaatada ii hanuunka foola leta. Markaasa may Ilaahay ku tuugay inii dad ii duunyaba kii fadaawba haadoo in fududaaya foola. May Ilaahay kuku tuugey siduun:-

Intii dhalaasoo
Dhillaan dhalaasa
Dhuuriyaasa
Dhammoow Ilaahow
Dhuuraaba haatoo
Ay dhibbooneey.

Sheekh Abdulle Isaaq, may haayey lan aalin eh oo walaagii usuga Ilaahay wiinow ku tuuga ma waaya jarna, mayna ku hadala jeray wal markaas dhiyaaw ii wal dhiya doona, mayna ku mid haayey walaa usu wal ku sheegi in wal"Dowlad" la erraaw kooya doonta, oona edda ii walaaltinima la shal qaybiya doona, yoona la isku fara doona, ø oo lan gar Islaameed nagaawna in jara doon-na yaa ku hadali; mayna errey:-

- Gar Islaan lan
  Sheegoo fadaasa
  Garna lan
  Goobtoo fadaasa
  Gaala qabne erraayaan
  Guuraanee erraayaan
  Gafanaajo yaa rorodaayaan
  Geedka gurigii ma eh, yaa la erree
  Guulwadii surumee, geekana
  gee sida ee yaa haayi, yaa erraayaan
  Galabtaas uniibaa guuri doon-nee
  Guulow Ilaahow in gargaar.

Sheekha may saadaaliya jarey walii ha dareera, dawlad-nimadii usu sheegiina dhimashoodiis reedshee yaa kooyti, walaagii usu sheegiina wal aragi, mayna dadka in sheegay in markii walaalgaas dhiyaan, walaagii yoo suubiya la haaye-en, oo eh inii yoo Alla ku absashi badiyaan, oo walaaguun see ka dhiyeenba inii yoo in erna, mayna erreey:

Shibley haaw walba
in sheegdoy
Shaleedaa ley deg
Shaahidkaa ley ku obsooy
Shanta waqta ley
Tukooy
Ay sheeniba in ertoo
Shuushaa kooyi hoo
laka erra
Shararagley sii
Shoofinta ley qaad
Shallaay ii shaka
Dhammada doonaan.

Meelaas sheekha may dadka ka tusaayey in walaagii yoo dhibsadaan, ama jirroodii yoo ka kooyta in diinta islaamka la kaashadaan, quraanka aqrisjayna badsadaan.

Sheekha mar usu ku hadalaayi in ulama ku danbooyta oo yoo diinta meella ku wedaayaan, oo yoo iniiska dheh jara

doonaan, haanoo dadka toosiyaayaan, ii haanoo dadka ka danooysadaayaan, May kaloo sheegay in usu kooyo doona Sheekh la erraaw Sheekh Banaana, ii walii usu la kooya doona, mayna erreey:-

Bahaanaa erraayaan
Barra ha nagooyaa
La erre,
Baahadaayaan, baabuuraa
Rahaayaan
Beshoo xaa seedaayaan
Buugaa la hakii
Dhikay ama beenaa
La hakiin sheegay
Yaa erraayaan,
Banaaniyow been
Sheegagii binaan
Abuurkii, bankii
Qiyaama adii baa
Boora doonta.

Sheekha mar usu ku hadalaayi, hanta inii yee hunta, yaa may baa inku digaayeey dadka muslimiinta eh in yoo afshoo ku reebadaan dadka kale, wal fayla iyoonay wal hunba inka sheegna; mayna erreey:

Fartiis gubeegii
Faruur eddaagii
Fool humaagii
Maddii la faano
Firsheyba haato
Ma faylahaayna.

Sheekha may ku hadalay sadaqada, sakada ii salaadda faa'iidada yee leta, mayna dadka ka hanuunuyi jareey, inii yoo adkeeyaan, mayna ku erreey:-

Soonka diidow
Salaada diidow
Sadaqada diidow
Sidii la sheegi
Siraadka seefa
Sidee ka moode.

Usugoo ku hadalaaw inii qof walba inka tala galna in aakhira wal la isa siiyaaw, ee wal siyowka ii wal deemiskaba adduunyada korshee lay ka egyiin, mayna erreey:-

Amuusha reedshe
Amaa iyooney awis
ma yaalloo intii
ka deegto amuuda
doonte ogaaw.

Sheekha dadka wa'dishey yaa eed inka dheeraadi, mayna dadka in tilmaama jaray inii yoo aakhira wal in hormarsadaan, oo yoo infiirina raahada ama rafaadka geeđka adduunyada korshee yaala, mayna eray:

Madii maliilnoo
Maliil la mooda
Moodna la mooda
Makaan mogdiilegii
May huraaw.

Sheekh Abdulle Isaaq may baa araga jarey, ama la tusi jaray walii ha dareera, wal kale isku dhaafe may la tusay dhimashoodiis, markaasaa may tiriyeey qowsaantun:

Qodoona kooytey
Qaraabaana boortay
Qool Ilaahayns
Kooyay, Qabooba
Nuurow qabri in-
jeedc jeedee qoortey furooy.

Usugoo Sheekha ku faaladaaw in Nabi Mohamed hariirshey la nagada yaa may erreey:-

Karanshey bireegoo
Hasan ii Huseen abooshoo
Hilaawla Nuurow hegee
Neboowle hey nii hurooyey.

Sheekha usugoo ku hadalaaw marka qofka dhimada in usu ehel ii qaraaba,ii weelid ii walaal koona wal in taraana, ee lan welba amalshey ii walaagii usu aakhira in hormarsadi lay wal taraayaan, yaa may erreey:

Raraagga meelshee
Rabba wiina maaya
Riineey ma taaloo
Ruunkaa fadaasoo
Lakoo raree.

Sheekha usugoo ku hadalaaw in toddobaada naarood liinku fakoda korna, Alla obsoodiis oo la badiya, tubta ~~x~~ toosan oo la raha, soon, salaad, saka, hajka oo lankii awooda in bahaaw ii Ilaahay ii Rasuulshey oo la rumaaya maaya si kale liinka fokadaana, yaa may errey:-

Toddobaada naareed
Tareegowshoo
Towba waa tukunrrma
Tubtii abbookey
Toosan qaadneen.

Sheekha usugoo wal ku sheegaaw in maliil faan eya hooba mawtu firijin kooya, yaa may erreey:

Moowti fijaagoo
maga ka dheegay
Mood na boobaaw
Maliilba faanle
Marsi magaashey
Min dhiibanoo.

Usugoo ku sheekoyaaw ajarka ahla-toowbada eh in waqti usu gududooba ajar ku helaaw yaa ka eddaayi, tusaaladiis, mayna dadka muslimiinta eh in tilmaameey inii yoo ka dadaalaan salaada, shanta waqtina koona inku fokona, oo ajarkaas in dhaafna. Mayna ereey:

Samaan ka shoobow
Summudba dhaafa sed
kule,
Sabaabka geeshey
Sardhaw ma yaaloo
Saas ogaada.

Sheekh Abdulle Isaaq, usugoo naftiis la hadalaaw oo in sheegaaw in Ilaahay usu wal kasta ogya oo kheer ii qasaara usu kiin haaya, adiina usu in aragaana, kan wal kasta oo ada kii dhiya usu kiin weelaaw yaa ku hadali mayna erreey:

Olkey ogaagey
Olkey inqaba
Il ma daaraada
Abboow rumaadow
Aran mayaagaa
Nii ammaansooy.

Sheekha mudadoo usu dadka waaniyaayi may ha qaadadeey in lankii soon, salaad, ii saka diida usu naarta seeda doona, lankii seddiidaas weeloona jinnaada seeda noona, mayna erray:-

Seddiida dhoori
Saroo jinnaadaa
Seeda doonee,
Seddiida diidi
Sa'iira naareed
Sedkiin bu waah.

Sheekh Abdulle Isaaq, sida usu dadka diinta inka fasira jari, wal inta la haka kooba kora ma eh, ee may kaloo ku mid haayey, in usu dadka in tilmaama ammaanta Ilaahay; mayna ku erreey:-

Faalooda haayneen
Fiirooda dhaafneen
Firi fooftoo filoow
Ka kooytoo faadir
Abbookey feliyaada.

Sheekha hadalshey may in badanaayey fasirka quraanka kariimka eh, oo usu Af-Soomaali(Lahjadda maay) ka fasira jari, mayna tilmaamaayey intii quraanka tilmaami, usugoo usugoo ku hadalaaw in quraanka kariimka eh usu in haayna wal la isku erri, yaa may erreey:

I'er ma haayne
Intii la sheegaw
Edda maaya
Al-Baqraadi uur-
wiin ogaatoy yee
Eddaaytey.

Sheekha markoo usu ka hadalaayi in Ilaahay wiina ha qaboojiya dadka muuminiinta eh, markii yoo ha arageen abaar kulul, jiilaalkana ka dheeraadi, yaa Ilaahay may ku tuugay in roob, aafimaad ii barwaaqa nebed leh siiya; mayna ka roob dooney sida:

Muumin ii maskiin
Dhibboodeey, meelba
rooga, Mawla Ilaahow
Markiin wal-waalow
Mandhar na sii.

Sheekha may hanuun in gergeera jaray dadka masaakiinta eh, oo walba in haaysana, ii haan la yasaaw oo foqorada eh.
Sheekha geeko usugoo dareeraaw yaa may hala kulumey ariirko aadiis ii aawshey dhimadeen, oo usuna jiran. Mayna qabey cudurka la erraaw(Hariira). Ariirkii yaa may ka booray Sheekhii, usuuna may Ilaahay inku tuugay in aafimaad siiya ariirkan. mayna erreyt:-

Aadiis ma nooloo
Aawshey ma nooloo
Ogoon waa, Ilaahow
Wiinow, adi ka
Tuugney Eedan
Ma dhaaftoo.

Sheekh Abdulle Isaaq, may hanuun neebaayey dadka geeda-geedaaga isti'maalaaw ama tafaafulowka eh, oo in kasaama Ilaaheykii abuuradi, oo quraankaba in aqoonsa-naayna. Usu oo,yoo wal ku sheegaaw, Sheekha may errey:-

Yaasiin Abbookey
Yasaagoo yagama
Ka roorkoo toonkii
Qiyaama Usiibaa
Yaaba doona.

Sheekha may mar walba ku sheekooya jaray, qof bina-aadan eh oo adduunka ka nool oo awood leh in usu in jama ee leh Ilaahay wiina lay awood ii quwuba. Mayna wal inku sheegay in dadka yoo ogaadaan tabartiyoo aakhirana hasuu-sadaan, mayna errey:-

Muumin Allow hooy!
Moddoo etaa
Mareer in diidooy
Masafka haysada
Maraaga reedshey
Mohamedka suura.

Sheekh Abdulle Isaaq may haayey lan Ilaahay karaamooysadi, mayna ku hadala jaray wal in dhiina maddaas la rooga. Marka usu walaagaas sheegaaw, sinnida badan ku demba yaa la araga jari.; Walaagii usu ku hadalaayi may ku mid haayey in wal Dowlad la erraaw kooya doonta, oo dadka la shal qiibiya doona, markaasna yoo in shal baha doonaan Hisba,hisba. Mayna errey:

Wal kulul ii Kumusaariya
Kabtan la erraaw-waa
Kooya doonee
Kedkaas maaba roognoo
Kalaan Abbookey
Yaa kabaalaana.

May kaloo ku hadalay awooda yeeda la kooya doonta Dowlanimada ii in gaala kooya doonta, awood gaalanima ii muslin dhibshayna la kooya doonaan. Usu oo taas ku hadalaawna may errey:

Tinaadnima erin eh
Taksi ka taala eh
Tala anii tun wiin eh
Taasaa damboytee
Tolow ogaada.

Sheekha yaa geekoo may faday in usu habar guursada, maddii usu in sheegadi jeelshay sii weeli, mayna ka helliiyeenaa in usu masaafaysada, markii yoo ~~xxx~~ deereen, meelii masaafada haayti, yaa habartii may la warsadey in yeeda walaayadiyee dhiibata, habartii diidi in laka mehriya Sheekha. Sheekha may reed in hasuusadey rafaadkii ii jidkii dheeraayi usu hamari, ii diidmada yeeda diidi. Mayna erray:

Jid dheeraa i qaatidey
Jeelkay ma gooynee
Jaliil Abboowow
Jirroodiyee jeer-kujeer ka weel.

Sheekha markuu usu ku hadalaayi in dadka ahla towbada eh, oo karatee nadiifka qaadadaayaan ii qamiiska fayla in yoo inla seedaana aakhira, ee yoo la seedaayaan amalshoo. Mayna ku errey:

Kufka been eh
Kamiiska been eh
Koofiyaada been eh
Walaagii ku kuusna
Wal noo leya.

Hadda ku hor yaa Sheekh Abdulle Isaaq may waydiisaday habar, habartiina way way siyi.Habarta aadiyeena ma ogolaayna inii ariirtiye wadaadkun la siiya.
Ariirta aawshee yaa amarshey ku biyi. Ariirtii markii arooska la jeeyi, yaa aadiyee may tarray; " Walaaguun widaad leeyaaha, gee maka daaraayoo, awkaa ku dhuumooy". Hammiin-nimadii yaa waanta-waal gebertii wedeti. Widaadkii wareersadi, may in direey hirtiis in yoo ha weydiyaan, waana way hawaayi. Hirtii sheekhii yaa inkooyeen may erreenaa; "Sheekh Alaaw, habartii tiitaa ha waayney may suubiyaana", Sheekhii may errey,"Habarta aadiyee idin haku qaada". Gebertii aadiyee may ertay; "Horaanba isku qaqayliya jaray walaagii usu tara kora suubiyooy", hirtii doogii yaa in sheegeen Sheekhii. Hatana

Hatana may hirtii in diray in yoo in seedaan oo idin haku qaadaan gebertii aawshee, awwkiina may erreey:
"Hooba isin oo sedda hamiin ii sedda gee waydiyaayiba waayteen, wal anna erraaw ma lehe, Sheekha walaagii usu fadaaw errooy.", Sheekhii yaa akhbaarkii aawka liin sheeni, markaasaa may errey:

Jirkeyna goyteey
Jeelkey ma dhaanee
Jaliil abookeey
Jirroodiyee jeerkoo
ka weel.

Sheekha may hanuun neebaayey dadka asraareyta eh, oo jeerratee Ilaahay kiba wal ka sheegaaw, mayna dadka inku digay in yoo ku dheeraadaan dadkaas. Haannaas baaliyoo may ku erray:

Asiimoley ayaan
Ilaahey, een in
Weelaaw, amuusha
Kooytey, aymoy ma
Taaloo, aadalla-aadaa.

Sheekha usugoo dadka ka hanuuniyaaw diinta Islaamka yaa may ku digay in aadaanka weeraaw liin dhugunsana, oo salaada shanta waqti liin shal roora, mayna erray:

Aadan weeraaw
Aloolka jiifa
Ooftiis in-
haayna
Islaamow abliis-
nimaadiis, eddaan-
ley ma ahaa.

Usugoo Alla obsoodiis meellii lay ku wedi oo ku sheekeeyaaw in mood in dheeraayna, aakhiraana laha dhowaaysada, may erray:

Obsi la tuugee
Aymoona diidee
Il laan wu, oodey
Abuur laan iin
Aærantooy wuh.

Sheekha may mar badan ku hadalay in diinta Islaamka Faa'iidooyin badan leta, daawana eta. Dadka muslimiinta ehna quraanka barashadiis waajib ka eta oo ka dadaalaan, taasna may ku erreyé-

Tabbad yaddaa,
Tubaarak, Yaasiin,
Taqilla dheer
Ka taagsadaa
Taliya Ilaahay
tuuga, todóbaada
Naarood, toona
ay siin daarnee.

Usugoo Sheekha ku hadalaaw dadka walba in aabudaani, amal fayla in suubsadaana, aakhirana hisaab fayla inkooyta fadaaw may erray:

Malooy malooy
Marooy marooy
mood madheere
Maddii la moodo
Masiiba wiintii
Mood gadaalsheey
Yaaha.

Usugoo Sheekha meellii ku weda guubaabada dadka muslimiinta eh, oo unku digaaw adaabta gee qiyaama la seeda; yaa may errey:

Soon ii salaad
Sujuud ogaaneen
Suurkii qiyaamaa
Sa'iira naartii
Ku seeranaaneen.

Dadka waanadaas la siyi, oo qaadada waaya si usu nagadaaw ii meella usu seedaaw yaa mau ku errey:-

Soon ii salaad
Sajuud diidow
Sa'iira naareedaa
ka Sooriyoodee.

Usugoo ku hadalaaw dadka aasi-waaladiinka eh oo aadiyoo ii aawshoo koona in dhooraana, dooshooba in weelaana may ku errey:

Aawshey tumeegoo
Aadiis ka yoonkoo
Aasa waaha, Olmaa
ku dheeney, adaabka
Oogaaw anfajey wah.

Usugoo ku hadalaaw diinta Islaamka ammaantiyee, ii faylahaantiyee, mayna errey:-

Diinteen diimoo
Dawladiyoo wuh
Diinla nuurow
Dabshee lan diiri
Dab naareed
Ma diiraaw.

Sheekh Abduule Isaaq may wa'dishay in badanaa-yey inii aakhira in lahaayna aaw ii aha, ehel ii aqraba ii widaay, ee lan welba usu shirkii qiyaama amalshey la kooyaaw. Oo lan kale wal in taraaw in lahaayna. Mayna Errey:-

Dabkoo in oogaana
Doogoo in weeraana
Deriskii hawaaleed
Daa'in abbookey
Maniin digtoo
Diintaa ka moodnoo.

Sheekha may kaloo ku hadalay ammaanta Naba Mohamed (S.C) ii in aakhira hisaab jarta. Mayna errey:

Duubshey hariir wuh
Diintiis furqaan wuh
Aw-Diinla Nuurow
Duhur qiyaama
Duubkaa ka moodnooy.

Sheekha usugoo ku hadalaaw lan widaad-humaaga eh oo Sheekhnimadana meel kuku dhiyaaw, muslinkana shaki giliyaaw may ku errey:

Sheekh wareeriyi
Shar'igii Ilaahay
Dooriyin shilin
Ku doorsada
Shirkii qiyaama
Naaraa sheegadaasa.

Sheekha usugoo qiraaw in Ilaahay maayi Ilaah kale in jarna yaa may errey:

Laa Ilaaha Illalaahu
Ilaah kale ma yaalloo
Illaa Abookey maaya.

Sheekha usugoo qiraaw in Ilaahay maaya Ilaah kale in jarna, yaa may orrey:

Laa Ilaaha Illaalaahu
Ilaah kale ma yaallo
Ilaah abookey maaya.

Sheekha may kaloo ku hadalay in lanka markii usu dhimmada in handoola la saaraaw, oo usu walba inka turunaayna, ee amalkii usu adduunyada ka suubsadi lay ku horreyta. Gargaar ii absaan oo usu dad kale ku filadaawna in jarna. May erray:

Geekii la guuraaw
niniin gawraaraaw
Geeda wiineega
Gun-naa i reebti
ii ga'alaa i reebti
Maaba taaloo
Guula wiinaaw
Niin gargaar.

Sheekha may dadka in sheega jaray in Ilaahay wal usu in ogaayna in jarna adduunkuh korshey, may in sheegay daka in yoo Ilaahay obsoodiis badiyaan, wal kasta yoo su-ubiyaayaan-na ka tala galaan in Ilaahay aragaaw, maynay heggaas ku errey:-

In wal ogaankii
Usii is og meeh
Ay ogaada kora
Ogaasha uunsheey
Inii ku wiinyaana
Kooy ogaaneenaa.

Sheekha usugoo ku hadalaaw quraanka kariinka eh mayaantiis ii faylahaantiis, yaa dadka muslimiinta eh in sheega in yoo baradaan. Mayna errey:

Sifaad mayaayi
Sida in yaalana
May ogaanee
Sifa mayaantaas
Safkii ogaadi
Suug la guuriyi wuh.

Sheekha usugoo ku hadalaaw, Ilaahay wiina maaya lan kale oo dad waldeega siya kora in jarna, oo usulay ersaagaaw, usley dilaaw oo noolaayaaw, arintaas may ku errey:-

Winig la waaraw
Walaagii fadaaw dhon
Walaa waayi
Wal dhon shaafiyaaw
Wal dhiibki-sheeyaa
Wal dhon deegee.

Usugoo ka hadalaax Ilaahay awooddiis may sheegay in lankii Ilaahay wiina tuuga in usu liibaanaaw oo walna in waayaana mayna errey:-

Wal meeba waynaa
Haddiiba Waaqeen
Wiin dhoornaan
Wal meeba haynaan
Haddiiba Waaqeen
Wiin dhaafna.

Sheekh Abdulle Isaaq, may marar badan ka nag-nagay in diinta Islaamka dadka sharaftiis dhooraasa, edeb ii soobanaan-na weeldhadaaw, mayna erreey:

Elifka diimeed
Ayadda quraameed
Ilmiga diinta
Edeb intii eya
May kiin eddaaynee.

Sheekh Abdulle Isaaq may dooshay in badanaayey diinta Islaamka, gaar ahaan may eed inku faaloodey, salaadda ajar ii hasanaadka yeeda leta. Markoo usugoo ku hadalaayi salaatu-naada laylka la tukudaaw may errey:

Suna leylka sujuuda
Salaad diimeedaa
Kiin edaayaasa.

Sheekha hadda ku hor yaa may ha masaafooysaday geber, Walii gee dhon yoo dareeraan, markii hamiin la deeri, yaa reerkoo ka hooyadeen, may la siiyeey, soor ii meel yoo jiifadaan, markii la bari gali yaa gebertii ii intii yeeda ha kati yaa dhuumati. Sheekh Abdulle hiraabtii markii usu ha kahi waayi geberii; markaasaa may errey:

Jirkeyna gooytey
Jinigey in dhaanee
Jidka ka dhiideey
Jaliil abboowoow
Jirroodiyee jeerba,
jeer ku weel.

Sheekha usugoo ku hadalaaw habarta fayla ii tan hun faraqa in dhohooya mayna, mayna ammaaney tan fayla mayna errey:-

Arad sameey hooy
Adeeg ii amaan
In diidooy
Maddii amuudoo
Adaabka naareed
Kuku aymadaasa.

Usugoo wal ku sheegaaw Eedaanka salaadda may amaaney in eedaanka qeer laya, aakhirana dad hasuusiyaaw, oo liin baahanya in lankii muslin eh oo dheega eedaan in usu in maliisada salaadda markaas la eedamaaw. Mayna errey:

Naadooda weeraasa
Nima waaha
Naar taraagshee waa
Naftey ii naagaa
Ku noogey
Nateey ka hedi.

May meelaas ka edaayeey in lanka eedaanka in roora usu naftiis ku adkaadi.
Sheekh Abdulle Isaaq may ku hadaley in howaada adduun liin rana, ee qof walba naftiis ku adkaada, oo ibaada ii towbada Ilaahay dadka fari haku baha. Mayna errey:

Hawa adduunyaa
Horteey dareertee
Horeey ku noogeey
Hungool ii hadag
Ma reebaa hawaa maaya.

May kaloo ku hadalay dadka jiiraanshoo dhibaaw in yoo adduunya ii aakhiraaba toona wal inka haaysana, mayna errey:-

Jiiraan dhiboow hooy
Jidkii jinnaada may
in gooyti?
Jeelkii ma dheera
Jahiima jeelshee
May in weeli.

Sheekha usugoo ku hadalaaw suufinimaadiis yaa may eddaayeey inii usu ii suufiyaaka kaleeba in yoo diinta adkaayeen oo allamma in suubiyeen, may kaloo sheegay in usu kooya doona Sheekh Uwees, markii usu dhimada reedshee; mayan errey:-

In war diimeed
Unii adkaayni
Allama in weelni
Uwees dheeraa
Allanshey la kooye.

May kaloo Sheekha eddaayi inii lankiiba nool usu geebba haata, geekooley guuraaw. Lankii adduunya jeeba-adoona aakhira naaraa jeeyaasa. Mayna errey:-

Jiifeey adduunya
"ankiiba jooga
Jeeraa ku guuree
Lankii Jimooytoo
Jeelshee in weela
Jahiimii jeyti.

Sheekh Abdulle Isaaq, markii udurka ka wiinaadi yaa may laka taliyeey inii lahan qaada beledka Baardheera oo usu baaliyee deganaayi, dadshey yaa gurba han rori, markaas yaa gurbigii la saari. Sheekhoo, Sheekh Abdulle Isaaq widaashey haayi oo magaashey la erraayi "Sheekh Shu'eeb" yaa may tiriyey qowsaantun. Mayna errey:

Shu'eeb aawshey
Sharkii in guuri
Shaafa saa
Shirkii qiyaamaa
Ka sheegadaana.

Sheekh Abdulle Usugoo ku jawaabaaw hadalkan oo is haaya waayi yaa intii usu boori may in eddaayeey Sheekh Shu'eeb in usu in shalaayaana hooba usu walaagii la fari suubiya. Mayna ka waaniyeey in soonka ii salaadda, sekeda seddiidaas ka dadaala, hoo Ilaahay ku aqbaloona aakhira wiiney in shilaaya doon-na. Maddaasaa Sheekh Abdulle tiri qowsaantun, mayna errey:

Shaahid abbookaa
Shantii ogaaw
Shaydhaan anaanooy
Shirkii qiyaama
I sheegatoona
Shillaay ma yaaloo.

Sheekha may dadka ka hanuuniya jaray faylahaanta yeeda leta Diinta islaamka, ii inii dadka shal biyaan walaagi hun ii walaagii fayla; mayna errey:

Wal hun ku roorneen
Wal san in roorneen
Waaqa tuugneen
Waakii bariyooba
Webigoo jinnaadaa
Webleysadaanee.

Usugoo ku hadalaaw in la badiya werdiga, Alla obsoodiisna laka dadaala, lankii werdiga laasimoo, Ilaahayna ku obsada, aakhira wiiney meel fayla yaa seedee. Jisadiisna janna wuh, usugoo taas ku hadalaawna may errey:

Lillaahi Ilaahey
Lankii laasima
Liibaan usuu leh
Liiroo jinnaadaa
Ka leersadee.

Sheekha may dadka ka waaniya jaray in dadka muslimiinta eh yoo uurshoo iniis humaayna, lankii walaalshay muslin eh, uurshey hummaan hanku gooya in usu adaab mutaysadaaw yaa eddaayi Sheekha, mayna errey:-

Olkii walaalsheey
Uursheu ku buuykii
Aasa waa Ulmaa
Ku dheegneey, infashey
Adaabka oogaaw wuh.

Sheekh Abdulle Isaaq, usugoo ku hadalaaw bilaanta Waanta-waalada eh, oo hartishee intii yeeda ku dhuumata harta kale in dhuumadaasa, yaa may ku errey:

Adeegashooda liin
edmadaana
Oota la qaadaaw
Ilaaha wiinow
Aradeeyba haatoo
Adaab ma jeytoo.

Sheekha may dadka ka hanuuniya jarey in yoo aakhira wal in hormarsadaan, oo yoo ibaada suuban falaan, mayna nasiib lahaa lankii janna shaqaysada, ee nasiib ma eh hoola badan yaa dhaqadi ii owlaad badan yaa dhali. Mayna qowsaantun ka sheegay, sheekha, in lankii usu dhuroowi jinna seedaaw. Mayna errey:

Walaa dhagni
Walaa dhalni
Dhur ma ehe'
Lankii dhuroowi
Dhuubaan jinnaadaa
Ka dheelmadi.

Sheekh Abdulle Isaaq may hamuun neebaayeey gaalada ii wehelshee, mayna dadka ka hamuuniya jaray in yoo ku dheeraadaan Kaafiriinta in aaminsanaayna Diinta islaamka. Mayna sheegay in gaalka ii lankii in tukudaan iska mid eyiin. Mayna errey:

Ma tukudeegoo
Ma darbadeegoo
Dilsheey halaalaaha.

Sheekha usugoo gaalada humaantiyee ku sheekeeyaaw may kaloo sheegay, inii gaalada aadadiyoo hun liinka deyana. Diinta Islaamka walaagii yeeda dad farta lay laka dhagama yaa may errey:

Aada urtooy hooy
Aftiinka diimeed
Uunka diidaaw
Asaala kuuskii
Urkoo in jeelaayna
Ogolaadeenaa.

Sheekha may dad tusaaleeyaayey sida aaddanka la'i-if in eya, mayna errey: "Dadka may laku suubiyey unjuf, uur aheedna laka anfaqaayi, markii usu bânaanka ha bahoona aasiyoobee, meellii usu Ilaahay ni'moodiis inka shukriya lahaaya oo usu Ilaahay inku obsada lahaayi, oo ibaad ii Alla obsoodiis badiya lahaayi. Yaa may bilaawey kibir jaahilnima eh ii mutakabirnima, oo susu han hasuusadaana in adaabkii qiyaama ku danbooya, adaabtana ees in aamaana dad maaya." . Qowsaantii usu arrintaas ku errâini sa haay-ti.:-

Awalkaayna unjufa haayni
Aayoowteen uurshee
nanii ersaagaayi
Adduunya kooyni
Aasiyoowmeey, adaabka
Oogaaw ay niinku
Aaree, Aadamow
ma obsotoo adaab
Ees ma daagaa.

Sheekha may hanuun jeelaayeey dadka ahlu-towbada eh, doosheyna may in badanaayeey in shanta salaadood li-inku tabna, mayna dadka ka guubaabiya jaray Islaan-nimada, usgoo salaadda ku hadalaaw may errey:-

Sidii daraarkii suuda
In guuri ey sumad
Laan ka suubiyi
Salaad abbookey
Sunnaadeenba waa
See liin himaamee.

Sheekha usugoo qiraaw Ilaahay awoodiis in lan binii aadan eh inku dhuumada korna, inka fokoda korna, yaa may sheegeey in Ilaahay lankii fadaaw adaabaax, lankii usu fadoona isku dhaafaaw. Mayna errey:-

I dhaaftoona addoonkaa
waa ahaa,
I adaabtoona addoonkaa
Waa ahaa,
Ilaase maaye hoo idiida
Ay inseede.

Usugoo Sheekha ku hadalaaw dadka muslimiinta eh in yoo inka yoo inka dhowaana, dadka yatiinta eh maalshoo, ee in yoo wal ka taraan dadka yatiinta eh maaya; lankii aamoona in usu shillaay in dambooya. Mayna errey:

Maalkii yatiimeed
Moodaaw la haayi
Mooda waayi
Moodkii gadaalshey
Maskiin-nimaadii
Miin danbooytoo.

Sheekha may shal biyeey inii bilaanta ii megelka nijaastiyoo iska too in haayna oo tan megelka wal yar biya eh hoo isku raasida bis eta', tan bilaantana dhaahiris liin baahanya. Mayna errey;-

Boqol naas ka noolkii
Boorta inkiyeenee
Bilaan in haayna
Biyoo dareeraaw
Bil-bilsamaaya baas ma leh.

Sheekha usugoo ku hadalaaw in Ilaahay wiina maaya qof kale oo awood leh in jerna, yaa may sheegeey in yoomulqiyaama geeshee, usu maaya lan kale wal sheega kora in jarna, ama wal adaaba kora ama wal afiya kora. Mayna errey:

Abboow adii eh
Addoon unii eh
Amar adii leh
Aabuud ma iilow
Uruur wiina geeshee
Eebteen daboo1 hee!.

Sheekha may ~~xxx~~ meel badan ku sheegay in adduunyadun yeeda beenlay eta, mayna ku digey inii la iniis raasina. Mayna errey:+

Aduunya beenaaha
Yeeda miirkeen ay
Ka toosneey,
Ibaada tuugneen
Ayma saa saaha!.

Sheekha usugoo dadka kula hadalaaw salaadda, may hanuun ka dheeraadeey in salaadda faa'iida badan leta; aafimaad hejeey, ii Alla obsoodiis hejeba. Mayna dadka ka waaniyeey in yoo in shal gooyna shanta salaadood, mayna errey:-

Gebleey ernaanoo
Gun dhaw ka maalnaana
Gee walba gabaan
Shirowshey
Geekii la mooda
Geekii
Gaar la seedi.

Sheekha may ku hadaley in yee in binaawaayna qaadashooda laku qaadadaaw qofka walaalkaa eh wal usu neebya ama usu raali unku haayna. Mayna errey:

Maniin binaawa
Maddii neebya
Maal walaalkaa
Mahaabba dhiibshey
Maddii ka biira
May turaayoo.

Sheekha may dadka in sheegay inii moodka in dheeraayna oo gee welba dadlay dhimadoohaaya, kii ibaada suubsada ii kii in suubsaneeba. Mayna sheegey:

Mowlaaw Ilaahey
Maga magaasheeya
In ya miin wu
Mas'haafna saasa
Walaa ha maada
Moodbu waa.

Usugoo Sheekha sheegaaw in Ilaahay Khaaliqu-Rahmaaneya, qof usu in haaynee wal abuura korana in jerna. Yaa Sheekha may sheegay inii Ilaahay meel adag ka tilmaamasaba in jarna. Mayna erray:-

Maddii dhoornoo
Mana adaabaa
Mowla wiinow
Makaan iyoonaay
Maga, jiheedba
May ka sheegnee.

Sheekha may eddaayeey in muuminiinta dhon liin demba dhaafaana ee lanba lanka kale usu ku ibaada badanya liin demba dhaafaaw. Mayna errey:

Moddoo Abbooshoo
Muumin humow
Dhon misla dhaafaa
Me-meredee maa
Muumin humow
Hooy, mis hantiidoo.

Usugoo Sheekha ku hadalaaw inii lankii amal fayla suubsada usu yoomal-qiyaama jinnaada abaalshey eta, kii meel hun in roorka haayina Yoomul-qiyaama naarta abaalshey eta. May errey:-

Muumin's samaagoo
Monkor ku roorkoo
Mansan in roorkoo
Maddii amuudoona
Ma mayaansi gooshey
Mool jinnaadu.

Sheekha usugoo ku hadalaaw lanka humaata in rooraw ii kan maas dadew in rooraaw, in yoo qiyaama meel hun la jeeyaaw, may errey:-

Muumun humoowkoo
Mankar in roorkoo
Maas in roorkoo
Maddii amuuda
Meel la jeeyaaw
Mey ogaadaaw.

Usugoo ku hadalaaw in dadka lanka meel ka hor maraaw, dadkana lamma meelood in shal qiibsama doonaan. Lan wal hun ii meel fayleeba in fadaana, ii lan wal fajla in rooraaw, yaa in shal bahaayaan. Qowsaantun-na may kuku hadaley lanka meel hun in roorka eh, mayna errey:

Wal san ku roorkii
Wal hun in roorkii
Waayeey moogaaw
Waakii qiyaama
Wareer la sheegey
Wareera doona.

Sheekha may ku hadaley inii dadka muslimiinta eh inka binaawaayna in yoo owridiyoo binaawaayaan, sida kaafiriinta haatow, ee yoo asturudaan awraadiyo. Ilaahayna sidaas raali inku eya. Mayna ku errey:

Amiin la deeraa
Aslahanaaneen
Awradaaynana
Astur in weelneen
Afkeen qiblaada
Eedineen.

Sheekha may sheegay in dhimoshooda waajib eta qof welbaoona dhimadaaw, intii unu in dhimaneena Alla ku Obsan, ibaada suubana hormarsana. Mayna errey:

Ta tukuneena
Ta taabaneena
Taab halaal eh
Towba sheen-neena
Toboow yaqiinwaa
Toos in guurneenaa.

Sheekh Abdulle Isaaq, may hanuun neebaayey taaruku-salaadka, tubaaka aanka ii tingur ii lanka tibilaaw qaraabadiis. Intaasna lan Ilaahay o'bsoodii in dhow maku jera. Intaasna Sheekha inku digi dadka muslimiinta eh; mayna ku waaniyeey in yoo afartaas koona inka sifowna. Usugoo qowsaan ku tiriyaawna may errey:

Taaruka salaadkoo
Tibaaka aankoo
Tin guraawkoo
Tolow ku heeda
Tiir shaaf waa.

Usugoo Sheekha wa'digii salaadda meeliis ku weda may sheegay in salaadda shal fadla badanta, tan jimaa'ada ehna ku fadla badanta salaadoo kale, sidaasaana qowsaantun ha dareerta ka sheegee, in salaadda jimaada jamiil eta waana liin baahanya, in yoo iniiska kooyaan dadka muslimiinta eh. Mayna errey:-

Jimaal salaadeed
Jimee' waa
Jeel in seeneen
Jidkaasna saari
Jid sheey ridii
Jor falee waa.

Sheekha may ku digay inii salaada dhatiyee laniis kala hadalna oo la isku dhoora salaatu shaki, oo eh markii qofka tukudaaw oo salaada dhatiyee iskala sheekeysadaaw, Sheekha may sheegay in yeeda in binaawaayna. Mayna errey:-

Salsheey eleen waa
Sabsheena hoos waa
Suf dhabaay sedkeen
Ku dhoorneen, sahuuda
Toosjee saasbu waa.

Sheekha may erreey usugoo ku hadalaaw, lanka salaadda sidii la fari inka tukudaanee jijibiyaaw. Lankaas jid feyla yaa ka dareera maaya salaaddiis sawaab ma leh mayna qowsaantun ka sheegay, sida salaadda sawaab inka lahaayna, lankaas oo kala. Mayna errey:

Saneen salaadeen
Sahoww dorraadiye
Si la sheegi surjunta
maaya sabaab iyooney
Se'eer ma lehe.

May kaloo sheekha ku hadalay in yeeda sharuudiyee inku mid haayna in salaadda dhatiyee, luku suubiya wal dhaqdhaqaaq la erraaw, ii wal ed eh oo ku bahsan intii salaadda luku tukudaayi oo dadka la fari. Mayna errey:

Ajesaal ii ooytii
Edkoo fureegoo
Ashuugeeytoo adkaasha
Maayi il har foowshoo
Ay lammaawney.

Sheekha usugoo ku hadalaaw inii dadka muslimiinta eh yoo eyiin lamma dhalati, oo liin baahanya in yoo meel haskula jeedsadaan yaa may aragay in dadka muslimiinta eh qilaaf ka dheh jira oo yoo dhibaata inis jeysada doonaan markii usu dhimidi ku ba'da. Markaasaa may tiriyey qowsaantun:

Tooban moo eh
Tunku laysku saaraaw
Talaantil seef eh
Niniiska turaana
Taasooy meelshee
Toobiyaaga toosan
Tiirkii Ilaahay
Ka taag sada.

Sheekha may ku hadalay ajarka ii hasanaadka soonka laya. May wal ku sheegay waqtiga sahuurta la aamaw, mayna eed in ammaanay intii waaka in bariina inii la sahuurada mayna errey:-

Hoolliis hamiin waa
Hanmuun higmaayneen
Hirma soon wiin
Haddiiba dhiido
Sahuur in deer
hamiinley waa.

Sheekha may wal ku sheegay in muslin maalsheey liin eya .. Aakhirana laniiska dhaafaana. Mayna errey:

Muslinka dilawsheey
Maalshey, aamowshey
Kan ka mardaadiyaaw
Moodkii reedsheey
Mugdigii hawaaleed
Makiin nuuraade.

Sheekha Abdulle Isaaq mayba aragay in dadka bershoo yoo aamaayaan dameeroo, yaa dadkaas may inku digay inii hilibka dameeroo usu haaraan eya. Waana in binaawaayna inii haaraan la aama. Mayna erreey:-

Ilkoo jariiray
Iddoo ku maaney
Afkur jaanley
Agal qaadka maaya
Ulmaa ku dheegney
Aamis ku haaraan waa.

Sheekha may hanuun neebaayeey dadka hukunka liin dhiiba oo dadka shal higsadaaw, reed may insheegey inii yoo wal la tusaaw. mayna errey:

Hukun Islaameed
Hingeeniyaaw shal
Higsadi hoolaa gaar wu
Haan jahiima ka jara
Hejoo waa etaa, saas
Hortaa taallooy.

Maddoo usugoo Sheekha ku hadalaaw bilaanta Waantawaalada eh oo barbaarka ka darsamaasa oo hamiin ii geeba dheel ii fisqa lay ka dhah jerta yaa Sheekha dadka unku digi mayna sheegay inii yoo aakhira wiiney maddii la deera inii wejishoo alaama la saaraaw oo yoo dadka inla mid haayna. Sheekha usugoo arrintaas ku hadalaaw may errey:-

Tan oo bahaasoo
In bood beraasoo
Baarbaar rahaasa
Bankii qiyaamaa
Bil-biliyee
Bariir la saaree.

Sheekha may ku hadaleey inii in faylahaayn tuugsashada, diinta Islaamkana inii yeeda in ogolaayna inii la tuugsada waliba lan litiis lihaad qaba inii usu tuugsada. Mayna errey:-

Dadley in seeno
Diriis ka maalna
Duul wareegaaw
Dugii hawaaleed
Dulla la sheegeey
Dadyow ogaada.

Usugoo Sheekha ku hadalaaw inii dadka yoo ka tiig-sadaan diinta islaamka, waana ka amal falaan. Yaa Sheekha may ku digeey in diinta la diidi. Lankii diidoona usu ku shillaayi doona. mayanerrey:-

Dad shaafu maayi
Dedib dabeedkoo
Doo gorodkoo
Diin Eebba diidow
Dadow gomoor hooy
Diin in diiddooy.

Sheekha usugoo ku hadalaaw inii guurka halaal eya, oo Diinta Islaamka yeeda dad faraasa inii bilaanta ni-kaah laka booba, ma'siyaadana laku dheeraada,. Lakii gebertiis hoola hay oo siyooy erra i-nii in faylahaayna-na sheegaaw may errey:

Kashif ku roorneen
Kudba ka kuurneen
Kii ha doorada
Karkoo ku sheensooy
Ku roogneen.

Sheekha may eed inka dheeraadey in yeeda in faylahaayna inii geberta hoola laka hira, oo la era gebertey ada oo intaas ii intaas in sheen-na ama inku biina may ka siyaaw. Yaa may ku errey:-

Bundigey iin buuy
Ii gaalaa koo fadee
Gartaas haan geedoo
In hooseysadaaw
Gooyaaw guf eddooytii
Inii goonkaa taalla
La kii geefaaw
Gorooy.

Sheekha may wal ku sheegay in aada abaashee liin guda korna wal kasboo aadana suubiya. Mayna erreey:-

Aayow sameeytey
Soddon iyooney sagaal
Sidoodey sa'iira
Naareed soshe in
Daarnee siide ku tuugni.

Sheekh Abudulle Isaaq usugoo ku hadalaaw sifaada fayla inii ls raha oo liin baalmarna, lan welboona sidii ka suubanaadaaw ka dadaala yaa, Sheekha may qowsaantun ka errey:

Sifaadka waajibsin
Seddi ii tumun wuh
Sifaadka sugneen
Sidiiba faylase
Noo ridaaya.

Sheekha usugoo ku hadalaaw dadka diidan quraanka kariika eh, ii dadka in weelaani hadalkii Ilaahay, yaa may eddaayey in yoo ku shillaaya doonaan. Mayna errey:

Sifaadka moogey
Sanuumi-yoowshee
Sidii edaayeen
Sa'iira naareed
Safkii ka waari
Seey ba wuh.

Sheekha may kaloo ku hadaley inii aada abaalshee liin guda korna lankii gudee erroona usulay ka noogaaw. Mayna Sheekha qowsaantun ka sheegay:-

Dhuubadii dhereb
Haniin dhegdi
Naasjee dhuugni
Dhiiqe haayni
Dhibshee ma
Dhiga kornoo
Dhamoow Ilaahow
Dhuubaan jinnaad
Ka dheelmi.

Sheekha may sheegay inii iilkii hawaaleed usu mugda eya, sida diinta laka sheegi, mayna Ilaahay ku tuugey inii Iilkii qiyaama niin aftiiniyo. Mayna errey:-

Ilaah wiinow
Uumow ersaagow
Ow galooba adii
ka tuugney iilkii
hawaaleed niin
Aftiini.

Sheekh Abdulle Isaaq may hanuun ka na-nagay inii Ilaahay wiina lankii fadaaw inii usu araga, in usu fi-iriya walaa usu abuuri, lan Ilaahay anii aragi leh, may sheegha, waana mal aragaaw. Illeen-na ma qobadaasa. Usugoo Sheekha arrintun ku hadalaaw may erray:

Ilaahay ma dhaamo
Ilaahay ileen ma
haay ay liin oon-neey
Israa'iil qaadow
Edeeg in rooboow
Eed ku kooyi.

Sheekha may ku hadala jaray, wal walba oo liin ara-gna, Ilaahayna dooshey in aqbala jari. Maddii usu ku ha-dala ku ba'da yaa la araga jari. Mayna sheegay wal kasta sida yoo eyiin geeka, inii yoo isku bedela doonaan. Mayna errey:-

Sidoo ha dareertoo
Siin sareey
Serbey gaal sariigadaasoo
Siraan lo' seeraraasoo
Indhoo la saaree
Reg sabaraayoo, siiga haan
Bilaan san galaasa
Yaa indhoo la saaree

./.

- safkaas meelshey
Sirney
Saantii suubaneega
Haanii iniiska seedi
Yaa salaama bahee,
Saroo jinnaad suuree.

Sheekha usugoo ku hadalaaw inii qofka kaafirka eh hoo Islaama intii liin deerna, amuusha wiiney, may weeli aakhira hoo la seeda may helaaw waqti reed la-haan nagadoo adduunka la kooya oo amal fayla la suub-sadi. Mayna errey suubsada, amal suuban oo aakhira wal kiin galaaw. Isheedana moora-gal muslimeedaaha yeena hay ka dedaalooy. Mayna hanuun ka tataagsadey in dadka la kooyaan Islaan-nima af in haayna oo uur eh' Mayna errey:

Yow Isheedooy
Intii amuushooy
Wiineey in kooyna
Intii in deerna
Isheedooy booboy
Ayma saasaaha.

Sheekha usugóo ku hadalaaw Malaku-mood, in usu waqtigaa kiin dhaafiyaana naf welboona leta waqti in gohon, oo hal daqiiqo lanka daraana. Malakumoodka hoo ada walkasta ku suubida oo ada i-mood ertoona liinku fokodaana, oo liin baahanya intii liin amuudna in amal fayla la hormarsada; yaa Sheekha may errey:

Hadal ma reebów
Is mooga moogey
May ka moodaa
Ma dheera
Ban meelis in
Moodaana man-
nakaataanaa.

Sheekha usugoo dadka inku digaaw munkarka ii walaa hun oo dhon yaa may errey:

Miin-saad ku dheegneen
Monkor ku dhoorneen
Mowla hooliis maddii weelna
Mandhar maddaas maha daayaaw.

Sheekha usugoo ku hadalaaw inii in faylahaayna in la aama, lanka mijidka eh maalshey, yaa may eddaayey in laku dheeraada, oo lankii aamana usu aakhira ku shilaaya doona. Mayna erray:

Moodkiina Iileey
Majidka maalsheey
May in aan-na
Mar huun waa
Maalshey in haadoo
Manfajeeyna.

Sheekha may ku hadalay dadka diinta diidaaw oo ka-afirnimaada in rooraaw, may sheegay in yoo sidii fada-ayaan in helaana. Oo wal kasta oo yoo fadaan waayaaya-an. Mayna errey:

Wan fadeegoo
Maleel fadeegoo
Manaasil moogagoo ---------- Warsadeegoo
Maamul adduunya
May ku fadee.

Sheekha may hanuun amaaney lanka ahlu sabarka eh kaas oo usu sheegi inii usu adduunya ii aakhiraaba sabarsheey ku moodaaw. Mayna ku errey:

Sabar sibiraa
Laakiin geekoo
Waa sed eya
Su'aala qabriga
Sakaraadka moodka
Siraad laka dhaafe.

Sheekha usugoo ku hadalaaw in lanka muslinka eh usu dhoora lanka kale ee walaalshey eh, Alla obsoodiisna badiya, yaa sheekha eed in ammaani. Mayna erray:

Waaqa tuugneen
Walaag la doori
Ii shan waqti
Werdiga haayneen
Walaalka dhoorneen
Weer san ii wiji furun
Inka waglalneen
Waajibka saasaaha
Ay laku wareerneey.

Sheekh Abdulle Isaaq may dadka Muslimiinta eh ka hanuuniya jarey Diinta Islaamka, may suubiya jaray walaagii diinta dad farta yaa may dadka inka fasiri jaray afka Maayta. Mayna tiriyey guubaabadan oo usu wal inka sheegaaw dadka muslimiinta eh oo Alla ii Nababa rumaayi; mayna faray Alla obsoodiis. Mayna errey:

-1. Aadamow intii jerto
Allagaa ku obsooy
Allagaa in saariyey
Nabigaa in saariyee

-2. Sir Allow sumun ma leh
Saf yaraa na haaysadee
Alla waahidaa in sheegney

-3. Wal welba ku dhonya
Waayta min mariina
Waayta min danbooyna

-4. Wal walba shaafiyey
Shantuu eeb tir waa
Toddobaa dembooytee
Too kalee la jartee
La'aantiyoo haaraan wuh
Lillaaga la saari

-5. Wal welba jaraana
Allo wal welba arageew
Wal walba dheegoow
Wal welba ka dewahoow
Waboow wakaan masanta

-6. Maajeey weelkanow
Mintaan ma leh
Maas makalihiini
Maagaa wal nii siyeey.

-7. Diinleegeen naboogeen
Dad doorshey la weeli
Dadow too ogaada
Diinteen Furqaanaaha

-8. Maallinkeen Allow dhoor
Maallinshey Allow dhoor
Mowlaagaa in tuugneey
Meel san Allow jeey.

-9. Waalidkeen Allow dhoor
Waalidjeey Allow dhoor
Waahidkaa in tuugneey
Waadiga jinnaad ku waraabi

-10. Allishey in gefow
Nabajee in gefow
~~xxxxxxxxxxxxxxxx~~
Diin Allow in gefow
Amalsheey buriyaa-

- Adaabtii ebedaa
  Agaadshey ruunshe
  Ka saabow
  Allow koo megeneey
  Aamineey yaa Allaa.

Sheekha usugoo sidii laka ogaayi dad wa'di in galaaw, yaa qowsaantun may ka sheegay in Ilaahay wal la baal dhikaaw in jarna lankii baal dhikoona Aakhira wiiney ku shillaayaaw, oo usu erraaw Ilaahow mar dembe man nagadaayoo markoo ley adduunyada iin nag, amal fayla ii ibaadadaa lay ha badsadoo; yaa ka shillaayee. Sheekha may dadka in sheegay in usu Ilaahay wal la baal dhikaaw in jarna. Mayna errey:

- Adaley abbow eh
  Annaley addoon eh
  Amar wiin adii leh
  Ilaah wiinow owkoo
  galooba, adii ka
  Tuugneey, adaab
  noo qobooy.

Sheekha may kaloo ku hadaley inii gura adduunya in haayna meel laka waaraaw, oo yeeda eta meel lamma gee liinka tala geli inii rooga oo amal suuban laka shaqeysada. Aakhira wiineyna liinka abaal gudaaw, walaagii usu sheqeysadi keer ii kasaaraba kiiba haata. Qowsaantun ha dareerta haa Sheekha arrintaas wal kuku erri:-

Gurugoo adduunya
Galab galooba
Ga'alley ku guuraaw
Guuraaw ma dheera
Guullow niin gargaar.

Sheekha hadaleediis may in badanaayeenaa dad guubaabin oo usu ka guubaabiyaaw inii yoo amal fayla ii ibaada san shaqeysadaan, hamiin ii geeba ku fekeraan walaagii yoo la seeda lahaayeen aakhira wiineey. Mayna errey:-

Ruunkoo adduunya
Roogoow maaya
Ruun maaŋa haayna
Ruunkeen rumaad
Ruun aakhira waaha
Rabbigeen rumaayneen.

Sheekha Abdille Isaaq may hanuun ka dheeraadeey Alla wiina ammaantiis, qowsaantun ha dareertana may ku mid eta Eebba ammaantiis. Mayna errey:

Allow erneenaa
Rabbow erneenaa
Inis hiisneenaa
Naar ey na daarnee.

Sheekha may eddaayeey inii aduunyadun liinka waaraana, lan welba oo is rasiiya. May weeli hooba adduunyadun laka waara lahaayi may rooga lahaayey Nabow Muhamad(S.C.).

Aakhirana Sheekha may ku sheegay in liinku haadaana wal welba oo la suubiya, lankii kooy ku roog is erroona iniin suurtoowaana, oo liin huraana. Mayna erray:

- Adduunya jeelnaa
  Ma helaanoo
  Aakhira neebnaa
  Ma huraanoo
  Awal ii aakhir
  Naba nuurka
  La waariyaa
  Amuudeey, amal
  Suuban ka oofaa
  Adaabka ay siin deernee.

Sheekha may ku hadalay in Ilaah baalliis lan welba ersaaq ka leya, oo in jerna qof ersaaqdiis lan kale la siiyaaw. Mayna errey:

Sataar oroodiis
Safar ma seenee
Safkii ogaayeen
Sugeenaa yaa
Salaama bahi.

Sheekh Abdulle Isaaq usugoo la dardaaramaaw Sheekh Shu'eeb yaa may in sheegay inii usu shanta salaadood usu in dhaafna, aakhira abaalshey helaaw. Mayna errey:

Shu'eeb yarow
Shantii Abbow ley
Shashoobi
Shirkii qiyaamaa
Shiddooda taala
Wal kiin shifee'ee
Ma shillaayaasoo.

Sheekha Abdulle Isaaq may ku hadaley inii dadka awlaadda dhali, yoo in shillaayna hooba onog yar ku sagiira, onogana usu hisaab iniin jarna aakhira. Awshey ii aadiisna yoo shifaa'a helaayaan. Sabarshoo ii iimaanshoona laka fiiriyaaw dhimmishooda onogga sagiirka eh. Mayna errey:-

- Maskiin tarowkoo
  Maamiinsadow
  maastoo in deerna
  Mowlaaw abookey
  Muumin dhammaantiis
  Mogdigii hawaaleed
  Miisaankii qiyaama
  Ay murugooneey
  Megentaa waa galni?

Sheekha usugoo jeeladi inii usu ammaan ku tiriyi Rasuulullaahi Muhamad Salawaatullaahi caleyhi, usu ii feristiis. Jimaalkii usu lahaayi ii Tilmaantii ferisjeey usugoo in shi'iraaw may errey:-

- Faya lahaayey
  Fool dhuubinaayey
  Fani lahaayey
  Faadima awshe
  Feriski fuuli
  Fool eddaayi.

Usugoo Sheekha mahabbada Nabigi(S.C.) ku badati inii usu afshey ka haayaw hamiin ii geeba madi han jeedi ammaantis inku dherigaani ya may errey, hatina usugoo ka shi'iraaw amaantii Rasuulka:-

Gera lahaayi
Guduudinaayey
Gedifa lahaayi
Gerwiina Nuurow
Geenyoodi fuuli
Fool giirinaayti.

Gunaanad

Buugaan kullisheey may ku sheekooyeey qisadii Sheekh Abdulle Isaaq(Eebehey in nahariisadaa) ii kaalintii usu haku qaadadi faafiska Diinta Islaamka, Sheekha may hanuun dadka wal inku sheega jaray faylahaan aakhira wiineey taala; ii adduunya beenley hummaantiyee. May kaloo dadka muslimiinta eh ka wa'diya jaray in yoo baradaan "Shanta tiir Islaamka" ii "Lihda Iimaan" mayna kula dagaallama jaray inii yoo kufranima ka dhimadaan.

Aakhirataankii ka guulaysadi wa'digiishey mayna ha muslimiyey dad badan oo gaala haayeen.
May aduudey "Hir" usu wal bara. Hirtiisma kiba koowaa in dhiibi Ilmigiishey, Illaa iyo al'aankun yaa haska deersiyeen. Sidaas yaa ka dhimmadI

Sheekha may ka duuganyaa misaajidka wiin ee Baardheere ka yaala dhatiis. Meellaasaana laka siyaaradee sinnid galooba oo siyaaradiis la deera.

===== ooOoo =====